



Marabtaa inaad gacan ka gaysato dhiiri-gelinta dariiqyada caafimaad iyo badqaabka leh marka loo socda dugsiga? Kaqaybgal sahanka

Barnamijka ay wado Magaalada Portland ee Dariiqyada Badqaabka ah marka loo socda dugsiga waxay dhiirigelisa qoysaska in ay adeegsadaan gaadiidka firfircoon (sida caadiga ah socodka ama baaskiil wadista) oo ay tahay habka ugu wanaagsan ee nabadgelyada leh oo habboon marka la aado iyo marka laga soonoqdo dugsiga. Waxay u baahan tahay kaalmadaada.

Portland Bureau of Transportation (PBOT) (Xafiiska Gaadiidka ee Portland) waxay qabanaysa sahamin sanadeedkeeda si ay xog ugu aruuriso Dariiqyada Badqaabka leh marka loo socdo Dugsiga. Sahanka waxay caawinaysaa PBOT in ay mudnaanta siiso mashruucyada ammaan leh iyo in ay xoojiso maalgelin loogu talagalay horumarinta kabaayasha iyo badqaabka Portland oo dhan.

Sahanka hadda wuu furan yahay wuxuuna xirmaya Jimcaha, Nofeembar 8. Waxaa lagu talagalay qoysaska ay carruurtooda kujiraan xanaanada ilaa fasalka sideedaad. Sida laga soo xigtay PBOT, waxay qaadataa ilaa 4 daqiiqo in la dhammaystiro.

[Halkan guuji si aad uga qaybqaadatid sahanka](#)

Sanadihii hore, sahanka waxaa lagu qaban jiray foomka waraaqaha boosta lagu soo diro, laakin PBOT waxay ubedeshay qaab khadka laga diro. PBOT waxay diyaar u tahay inay dugsiga u dirto shaqaalaha wataa kombiyuutarro iyo miisasaska si ay qoysaska u helaan sahaminta, iyadoo ay caawinayaan shaqaalaha PBOT, inta lagu guda jiro munaasabadaha ay maalgelinayso dugsiga. Dugsiyada danaynayaa waa in ay iimayl udiraan saferoutes@portlandoregon.gov.

Natijadaha dugsi-ka-dugsi ee sahanka 2018 waxaa [laga heli karaa bogga PBOT](#).

Dugsi kasta oo leh kaqaybqaadashada sahanka ee 20% ama ka sareeya waxay ka heli doontaa \$100 kaarka hadiyadda sahayda ee ka socota PBOT.